



Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Judiciary Affairs
Office of the Minister

Ref: WC&AG/XW/ 552 03/2020

Date: Mar 30, 2020

BAAQ MAMNUUCID

Ujeeddo: Mamnuucid Isticmaalka, Boobka iyo Qaadashada Sharci-daradda ah ee lagu hayo dhammaan Dhulalka iyo Hantida Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed:

Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);

- Asagoo tixraacaya** Qodobka 102^{aad} ee Dastuurka Ku-meel-gaarka (KMG) ah ee JFS;
- Markii uu arkay** Qodobbada 2^{aad}, 3^{aad} & 4^{aad} ee Sharciga Xabsiyada Soomaaliyeed (Sharci Lr. 7, ee 30 December 1971) iyo guud ahaan Qodobbada Sharcigaas ee la xiriira maamulka Xabsiyada dalka iyo ilaalintooda;
- Markii ay soo gaartay** Warqadda kasoo baxday Taliska Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed ee Summadeedu tahay (T/G/C.A.S/X/T/G/99/2020) ee ku Taariikheysan 29/03/2020, ujeedadeeduna tahay “warbixin dhul boob” lagu hayo “Xabsiga Weyn ee Keesanee ee ku yaal Degmada Kaaraan, Magaalada Muqdisho;
- Markuu tixgaliyey** Waajibka Qaran ee ah in la ilaaliyo Hantida guurtada iyo ma-guurtada ah ee ay leeyihiin Hay’adaha kala duwan ee Dawladda JFS, gaar ahaan dhulalka Ciidanka Asluubta;
- Markuu ogaaday** In dad Soomaaliyeed oo dano gaar ah wata ay isticmaal, boob iyo qaadasho sharci-darro ah ku hayaan dhulalka C.A.S ee ku kala yaal goobo iyo magaalooyin kala duwan ee dalka;

Wuxuu gabi ahaan mamnuucay in si sharci-darro ah loo isticmaalo, loo qaato ama boob loogu geysto dhulalka ama hanti kasta oo ay leeyihiin Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed. Waxaana la amrayaa cid kasta oo waqti hore ama haddaba sharci-daro ku isticmaasha, ku haysata ama boob u geysatay dhulalka iyo hantida kale Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed in ay si degdeg ah u baneyso kuna soo celiso gacan ku haynta Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed, haddii kale waxa laga qaadayaa tallaabo degdeg ah oo Sharciga dalka waafaqsan.

Avv. Xasan Xuseen Xaaji
Wasiirka Cadaaladda Xukuumadda JFS



📍 HQ : martine hospital road, hamar-weyne district, Mogadishu - Somalia

📞 P.O.Box: 629, Hotline No. +2521 - 865880 | +2521-613173317

✉ Minister@moj.gov.so | Info@moj.gov.so 🌐 Moj.gov.so